# Fayraska keeni kara noocyada kansarka kala duwan ee loo yaqaano Human Papillomavirus (HPV) iyo Tallaalka

## Waa maxay HPV?

- HPV waa cabuqa la yirahdo human papillomavirus oo lasoo gaabiyey. Waa fayruska caadiga ah waxaana caabuqa HPV qaadi karaa qiyaastii 8 ka mid ah 10-kii qof waa haddii aysan qaadan tallaalka. Inta badan dadka uu ku dhaco HPV ma muujiyaan calaamado ay ku garan karaan, caabuqu ayaana iskii u baaba'aa. Qiyaastii 20 boqolkiiba dadka fayrasku kama baxo oo waxaa u horseedi karaa kansar (kan ilmo-galeenka, futada, xubnaha taranka, afka iyo cunaha) iyo burooyinka xubinta taranka.

## Ma ogtahay?

- Kansarka waa waxa ugu badan ee sababa dhimashada ee dalkan Canada, qiyaastii boqolkiiba 5% ee dhammaan kansarrada adduunka waxaa sababa HPV.
  Ku dhawaad 3,800 kiis oo cusub oo kansar ah oo laga diiwaangeliyay Canada ayaa waxaa sababay HPV waxaana tiradan la filayaa inay laban-laabato oo ay noqoto ilaa iyo 6,600 meesha lagu gaaro 2042.

## Sidee ayaan ku qaadi karaa HPV?

- In maqaarka uu taabto maqaarka qof kale oo qaba cudurka (dhunkashada ama taabashada) meelaha xubnaha taranka (oo ay ku jiraan guska, xiniinyaha, siilka, bushimaha siilka ama futada) ee qofka qaba caabuqa HPV.
- Looma baahna in galmo la sameeyo si loo qaado HPV.
- Dad badan oo qaba HPV ma oga inay qabaan fayraska waxaana laga yaabaa inay sii qaadsiiyaan dad kale.

## Maxaa ku jira tallaalka HPV (Gardasil®9)?

- Tallaalada papillomavirus ee bini'aadamka waxaa ku jira nooc fayraska ah oo dhintay, oo aan shaqayneyn. Tallaalku wuxuu jirkaaga u diyaariyaa difaac (difaacyada jirka) oo ka difaacaya cudurka.

| Walxaha ku jira tallaalka HPV | Halkee kale ayaa laga helaa walxahan? |
|---|---|
| Sodium chloride | Jirka aadanaha, cusbada |
| Aluminium | Khudaarta, badarka |
| L-histidine | Jirka aadanaha, digirta |
| Polysorbate 80 | Jalaatada, farmaajo yar |
| Sodium borate | Biyo, ciidda |
| Khamiir | Jirka aadanaha, rooti |

## Yaa qaadan kara tallaalka HPV?

- Tallaalka HPV waxaa lagu heli kara barnaamijka si guud loo maalgeliyo ee loogu talagalay dhammaan shakhsiyaadka laga bilaabo fasalka 7 iyo ilaa dhammaadka fasalka 12-a
- Waxa lagu bixiyaa barnaamijka dugsiga ku salaysan ee fasalka 7-aad.
- Shakhsiyaadka aan wada qaadanin taxanaha tallaalka meesha lagu gaaro dhamaadka fasalka 12-aad, waxay ku heli karaan talaalka iyagoo iska bixinayaa lacag taas oo la siinaayo bixiyaha daryeelkooda caafimaad.

## Sidee ayaan iskaga ilaalin karaa HPV?

- Qaadashada tallaalku waa habka ugu wanaagsan ee aad iskaga ilaalin karto HPV oo ay ku jiraan kansarrada ay keeni karaan iyo sidoo kale burooyinka xubinta taranka.
- Haddii aad ka fekereyso inaad galmo samayso, waxaa jira siyaabo aad iskaga ilaalin karto HPV. La hadal waalidkaaga, bixiyaha daryeelka caafimaadka ama gal mareegta Ottawapublichealth.ca/immunization si aad uu hesho macluumaad dheeraad ah.

## Waa maxay waxyeellooyinka ka yimaada Gardasil®9?

| Kuwa inta badan la isku arko | Kuwa ay yar tahay in la isku arko | Kuwa halista ah ee ay tahay dhif iyo naadir in la isku arko |
|---|---|---|
| Guduud, xanuun iyo/ama goobta oo ku bararta, gaar ahaan inta lagu jiro 24-ka saacadood ee ugu horreeya | Madax xanuun iyo/ama qandho fudud | Xasaasiyad daran oo keenta dhibaato dhanka neefsashada ah, bararka wejiga ama afka, burro |
| **Daawaynta:** Baraf saar aagga aad ka qaadatay tallaalka iyo/ama qaado acetaminophen (tusaale Tylenol®) | | Kalkaaliyaasha caafimaadka waxaa loo tababaray inay daweeyaan falcelinta daran |

## Gardasil®9 badbaado ma yahay?

- Haa, Natiijooyinka daraasadda Gardasil®9 waxay aad ugu eg yihiin Gardasil ® oo si badbaado leh Canada looga isticmaali jiray sannado badan.
- Kama qaadi kartid HPV tallaalka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tallaalkan, fadlan booqo: https://www.ontario.ca/page/getting-hpv-vaccine